**Xafiiska Tacliinta Sare ee Minnesota**
**Xeerka Codsashada Xogta ee Dadweynaha**
Xeerka Minnesota §13.025 iyo §13.03 ayaa ku waajibinaya dukumeentigan.

**Xuquuqda Helitaanka Xogta Dadweynaha**

Sharciga Maaraynta Xogta Dowladda Minnesota (Minn. Stat. §13) wuxuu dhigaya in dhammaan xogta dowladda ay yihiin xog dadweyne ilaa sharci federaal ama mid gobol ah, ama kala-soocid ku-meelgaar ah, ay sheegaan in xogtu aysan mid dadweynaha u furan aynan ahayn. "Xogta dowladda" waa dhammaan xogta la diiwaangeliyay oo ay hayso hay'ad dowladeed, taas oo ay abuurto, ururiso, kaydiso ama ilaaliso si ay shaqadeeda u qabato.

Sharciga Maaraynta ee Xogta Dowladda Minnesota wuxuu farayaa in hay'adaha gobolka ay xogta ukaydiyaan in si fududna loo heli karo. Waxaad xaq u leedahay inaad si bilaash ah u eegto (kormeerto) dhammaan xogta dadweynaha ee uu hayo Xafiiska Tacliinta Sare. Sidoo kale, waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqullo xogta dadweynaha. Waxaad xaq u leedahay inaad xogta eegto si bilaash ka hor intaadan go'aansan inaad dalbato nuqullo. Sharciga Maaraynta ee Xogta wuxuu u oggolaanayaa in XAFIISKA TACLIINTA SARE inay lacag ka qaaddo marka aad dalbaneyso nuqulladaha( koobiga) xogta.

**Sida Loo Codsado Xog**

Mas'uulka qaabilsan xogta waa qofka uu sharcigu si gaar ah u magacaabay inuu mas'uul ka noqdo ururinta, isticmaalka, iyo faafinta xogta ay hayso hay'ad dowladeed. Hay'adaha heerka gobolkana, mas'uulkaasi waa komishanka. Codsiyada xogta waxaa caadiyan iska koordineeya Mas'uulka U Hoggaansanaanta Xeerka Xogta. Haddii aad rabto inaad eegto xog ama aad hesho nuqullo ka mid ah xogta uu hayo Xafiiska Waxbarashada Sare (Xafiiska Tacliinta Sare), codsigaaga ku wajah Mas'uulka U Hoggaansanaanta Xogta. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan cidda aad la xiriiri lahayd, waxaad wici kartaa Xafiiska Tacliinta Sare adigoo adeegsanaya 651-642-0567 ama 800-657-3866. **Codsiyada warbaahinta** waxaa gacanta ku haya Agaasimaha Xiriirka Warbaahinta.

**Waa inaad codsigaaga xogta ku soo gudbisaa qoraal ahaan.** Email-ku waxaa loo aqoonsan karaa inuu yahay codsi qoraal ah. Markaad dirto codsigaaga xogta, waxaad filan kartaa in lagugu soo jawaabo oo laguugu xaqiijiyo in codsigaaga la helay laba maalmood oo shaqo gudahood. Haddii aan laguu soo jawaabin laba maalmood oo shaqo gudahood, fadlan la xiriir Mas'uulka U Hoggaansanaanta Xogta adigoo wacaya 651-642-0567, kadibna riix 9, ka dibna 0. Waxaad isticmaali kartaa foomka codsiga xogta ee ku yaal bogga 5, hase yeeshee *loogama baahna* inaad foomkaas isticmaasho.Haddii aad doorato inaadan isticmaalin foomka, codsigaagu waa inuu ka koobnaadaa:

- Inaad tahay xubin ka tirsan dadweynaha oo codsanaya xog si waafaqsan Xeerka Maaraynta Xogta (Minn. Stat. §13).
- Inaad bixiso sharraxaad cad oo ku saabsan xogta aad rabto.
- Inaad sheegto haddii aad rabto inaad eegto xogta, nuqul ka hesho, ama labadaba.

XAFIISKA TACLIINTA SARE ma qasbi karto inaad sheegto magacaaga ama sababta aad xogta u codsanayso maadaama aad tahay xubin ka tirsan dadweynaha. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo ku xiran sida aad rabto in xogta laguu siiyo (tusaale ahaan, haddii aad rabto in xogta laguugu soo diro boostada), waxaa laga yaabaa in Xafiiska Tacliinta Sare ay u baahato xog xiriir kaa helaan. Fadlan xasuuso: haddii XAFIISKA TACLIINTA SARE uusan fahmin codsigaaga oo uusan haysan waddo uu kugula soo xiriiro, waxaa dhici karta inaysan awoodin inay wax ka qabo codsigaaga.

**Sida Xafiiska Tacliinta Sare Uga Jawaabto Codsiga Xogta**

Markaad dirto codsigaaga xogta, Xafiiska Tacliinta Sare waxay kuugu soo jawaabi doontaa laba maalmood oo shaqo gudahood, iyadoo kuu sheegaysa in codsiga la helay isla markaana hadda la eegayo. Jawaabta laguugu soo dirayo waxay noqon doontaa qaabka aad adigu u dirtay codsigaaga (tusaale ahaan, email ama warqad), ilaa aad si gaar ah uga codsato hab kale oo isgaarsiin ah. Haddii aadan helin wax jawaab ah laba maalmood oo shaqo gudahood, fadlan la xiriir Mas'uulka U Hoggaansanaanta Xogta adigoo wacaya 651-642-0567, kadibna riix 9 ka dib 0.

Haddii aan si cad loo fahmin xogta aad codsanayso, Xafiiska Tacliinta Sare waxay kaa codsan doontaa in aad bixiso faahfaahin dheeraad ah. Haddii aad codsigaaga u qorto si gaar ah oo kooban, Xafiiska Tacliinta Sare waxay si fudud u heli kartaa, u eegi kartaa, una bixin kartaa xogta — haddii xogta la codsaday ay jirto. Codsiyada raadinaya xog aad u baaxad weyn ama aan qeexnayn waxay inta badan keenaan xog tiro badan, taasoo qaadan karta waqti dheer si loo farsameeyo.

- Haddii Xafiiska Tacliinta Sare uusan haysan xogta aad codsatay, waxaa laguugu soo sheegi doonaa muddo aan ka badnayn 10 maalmood oo shaqo.
- Haddii Xafiiska Tacliinta Sare hayso xogta, laakiin xogtu aysan ahayn mid dadweyne, Xafiiska Tacliinta Sare waxay sida ugu macquulsan ugu dhow kuugu soo sheegi doontaa, iyadoo sidoo kale tilmaamaysa sharciyada si gaar ah u sheegaya in xogtaasi aysan dadweyne ahayn.
- Haddii Xafiiska Tacliinta Sare hayso xogta, xogtuna ay tahay mid dadweyne ah, XAFIISKA TACLIINTA SAREwaxay codsigaaga kaga jawaabi doontaa si habboon oo degdeg ah, waqti macquul ah gudahii. Haddii xogta jawaabta laga bixinayo ay aad u tiro badan tahay, XAFIISKA TACLIINTA SAREwaxay xogta u bixin kartaa si kala qaybsan ilaa inta jawaabtu dhammaystirmeyso. Xafiiska Tacliinta Sare waxay codsigaaga uga jawaabi doontaa mid ka mid ah hababkan:
    - In laguugu qabto waqti, taariikh, iyo meel aad si bilaash ah ugu eegto xogta; ama
    - In laguugu diyaariyo nuqullo ka mid ah xogta sida ugu macquulsan ee suurtagalka ah. Waxaad dooran kartaa inaad nuqulladaaga soo qaadato ama Xafiiska Tacliinta Sare ayaa kuu soo diri doona. Haddii xogta la hayo ay ku jirto qaab elektaroonig ah, Xafiiska Tacliinta Sare waxay ku siin doontaa nuqullo elektaroonig ah marka aad codsato. Waqtiga ay qaadanayso in la farsameeyo codsigaaga wuxuu ku xirnaan doonaa dhowr arrimood, sida tirada nuqulada la rabo, inta shaqaale ah ee diyaar u ah inay ka shaqeeyaan, iyo inta codsi xogeed ee kale ee markaas la qabto. Lacagaha ku saabsan nuqulada waxaa lagu sharaxay qaybta hoose ee dukumentigan.

Haddii aadan fahmin qaybo ka mid ah xogta la bixiyay (sida erayo farsamo ah, gaabisyo, ama xarfo kooban oo magacyo u taagan), fadlan la socodsii Mas'uulka U Hoggaansanaanta Xogta. In kasta oo sharcigu aanu nagu qasbin inaan ka jawaabno su'aalaha aan si toos ah u quseyn codsiga xogtaada ama inaan sharaxno xogta dadweynaha ee laguu bixiyay, Xafiiska Tacliinta Sare waxay dadaal ugu fidi doontaa inay ku caawiso si ay kuu sharaxdo.

Xeerka Maaraynta Xogta ma farayo Xafiiska Tacliinta Sare in ay abuurto ama ururiso xog cusub si ay uga jawaabto codsi xogeed. Sidoo kale, XAFIISKA TACLIINTA SARElooma baahna inay bixiso xog qaab gaar ah ama hab gaar ah haddii aan xogtaasi sias ku jirin. Haddii Xafiiska Tacliinta Sare oggolaato inay abuurto xog cusub si ay uga jawaabto codsigaaga, waxay kula shaqeyn doontaa arrimaha faahfaahinta codsiga, oo ay ku jiraan kharashka iyo muddada jawaabta.

Waxaad samayn kartaa codsiyo joogto ah oo xog ah. Codsiyada joogtada ahi waa codsiyo xogeed oo laga yaabo in loo baahdo in si isdaba joog ah looga jawaabo muddo dheer gudahood. Codsiyada joogtada ah waxay dhacayaan kadib saddex bilood, waxaana dhammaan lacagaha looga baahan yahay in la bixiyo dhammaadka muddada saddexda bilood, ka hor inta aan la cusboonaysiin codsiga joogtada ah.

Xogta kooban waa diiwaanno tirakoob ah ama warbixinno laga diyaariyay xog gaar ah ama sir ah oo laga saaray dhammaan aqoonsiyada lagu garto shakhsiyaadka. Xafiiska Tacliinta Sare waxay diyaarin doontaa xog kooban haddii codsaduhu codsigiisa ku soo gudbiyo qoraal, isla markaana si hore u bixiyo kharashka la qiyaasay ee diyaarinta xogtaas. Lacagta dhammaystiran ee diyaarin xogta waa in la bixiyo ka hor inta aan Xafiiska Tacliinta Sare ku wareejin xogta kooban. Waxaad isticmaali kartaa foomka codsiga xogta ee bogga 5, hase yeeshee loogama baahna inaad isticmaasho foomkaas. Waxaan kaga jawaabi doonaa codsigaaga gudahood 10 maalmood oo shaqo anagoo kuu sheegayna faahfaahinta ku saabsan goorta xogta la heli doono iyo kharashyada la qiyaasay. Haddii aad doorato inaadan isticmaalin foomka codsiga xogta, codsigaagu waa inuu ka koobnaadaa:

- Inaad tahay xubin ka tirsan dadweynaha oo codsanaya xog kooban si waafaqsan Xeerka Maaraynta Xogta (Minn. Stat. §13).
- Sharaxaad cad oo ku saabsan xogta kooban ee aad rabto in la diyaariyo, iyo qaabka aad rabto in lagu siiyo (tusaale ahaan: warqad, elektaroonik, iwm).

**Kharashaadka Laga Qaado Dadweynaha**

Xafiiska Tacliinta Sare waxay dadweynaha ka qaadaa kharashka nuqullada (mid warqad ah ama elektaroonik ah) ee xogta dowladda. Kharashyadan waxaa oggolaatay Xeerarka Minnesota, qaybta 13.03, farqadda 3(c)). Waa inaad bixisaa kharashka nuqullada **ka hor** inta aan lagu siinin. Waxaa dhici karta in lagaa dalbado dhigaal (deposit) ah oo ku saleysan kharashka la qiyaasay ka hor inta aan la bilaabin raadinta iyo soo saarista xogta la codsaday. Lama qaado wax kharash ah si aad u eegto xogta ama si loo kala saaro xogta dadweynaha iyo xogta aan dadweynaha ahayn.

- 100 bog ama ka yar oo nuqullo ah, madow iyo caddaan, oo ah cabbir warqad caadi ah ama sharci ah (letter/legal size), waxaa lagu leeyahay 25¢ halkii nuqul hal dhinac ah, ama 50¢ halkii nuqul labo dhinac ah.
- Kharashka nuqulka noocyada kale ee xogta — marka aanay jirin sharci ama xeer si gaar ah u dejinaya qiimaha — waa kharashka dhabta ah ee ku baxa raadinta, helidda, samaynta nuqullada, ama dirista xogta elektaroonik ahaan.

    - Marka la go’aaminayo kharashka dhabta ah, Xafiiska Tacliinta Sare waxay ku darsataa waqtiga shaqaalaha ee ku baxa diyaarinta iyo dirista nuqullada, kharashka agabka lagu koobiyay xogta (sida warqad haddii ay ka badan tahay 100 bog, CD, DVD, iwm), iyo kharashaadka boostada (haddii ay jiraan).
    - Haddii codsigaagu yahay xog aanan annagu si toos ah u koobi karin, sida sawirro ama agab gaar ah, waxaa lagaa qaadi doonaa kharashka dhabta ah ee aan ku bixinno shirkadda dibadda ah ee samaysa nuqullada.
    - Kharashka waqtiga shaqaalaha waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo la adeegsanayo saacaddii uu qaato shaqaalaha ugu mushaarka yar ee awooda inuu hawsha dhammeeyo, lagu darayna 20% dheefaha la xiriira shaqada (fringe benefits).
    - Haddii, marka la eego codsigaaga, aan u baahanno in shaqaale mushahar sare leh uu xogta raadsho ama soo saaro, kharashka raadinta iyo soo helidda xogta waxaa lagu xisaabin doonaa iyadoo la adeegsanayo heerka mushaharka shaqaalahaas.

**Xogta Xiriirka ee Xeerka Maaraynta Xogta**

**Fadlan u dir dhammaan codsiyada xogta adigoo adeegsanaya mid ka mid ah hababkan:**

Boosto:
Data Practices Compliance Official
1450 Energy Park Drive, Suite 350
St. Paul, MN 55108-5227

Fakis: 651-642-0675, Fadlan ku qoro: "Data Request – public" (Codsi Xog Dadweyne) bogga sare ee fakiska, kuna hagaaji Mas'uulka U Hoggaansanaanta Xogta ee hoose.

Iimayl: Ku qor qaybta subject-ka: "Data Request – public" U dir email cinwaanka datarequest.Xafiiska Tacliinta Sare@state.mn.us

**Responsible Authority ( Mas'uulka Xogta)**
Dennis Olson Jr., Commissioner ( Komishanka)

**Data Practices Compliance Official (Mas'uulka U Hoggaansanaanta Xogta)**
Andrew Wold, General Counsel ( La-Taliyaha Guud)

**Xafiiska Tacliinta Sare ee Minnesota**
**Foomka Codsiga Xogta Dadweynaha**

| | | |
|---|---|---|
| **Magaca:** | | **Taariikh:** |
| **Cinwaanka:** | | |
| **Magaalada:** | **Gobalka:** | **Lambarka Boostada:** |
| **Lambarka Taleefoonka:** | **Iimayl:** | |
| | | |

Fiiro Gaar ah: Looma baahna inaad bixiso macluumaadka kor ku xusan. Si kastaba ha ahaatee, Xafiiska Tacliinta Sarelaga yaabee inuusan ku siin karin xogta dadweynaha ee ku saabsan codsigaaga haddii aan la haysan macluumaad lagugu soo xiri karo.

Fadlan ku sharax sanduuqa hoose xogta aad rabto in Xafiiska Tacliinta Sareku siiyo:

☐ Kormeer ☐ Nuqullo ☐ Labadaba – kormeer iyo nuqullo

| |
|---|
| |

MS § 13.03, farqadda 3aad, waxay siineysaa Xafiiska Tacliinta Sare awood ay kharash uga qaado si loo daboolo kharashyada la xiriira bixinta nuqulka xogta, oo ay ku jirto waqtiga lagu bixiyo raadinta iyo helidda xogta la codsaday. Lacag bixinta waa in la sameeyaa ka hor inta aan nuqullada la helin, waxaana laga yaabaa in la codsado dhigaal (deposit) kahor inta aan shaqada la bilaabin.